

Busaylkii Safiya – W/Q. Ibraahin Yuusuf Axmed ”Hawd”

Aarjoog baan ku dhashay, ku barbaaray, ku guursaday, carruurtu iigu dhalatay, oo ku noolaa ilaa maanta. Eebbihii dhulka qaybiyay baa annaga halkan nagu galladay. Berigii aan yaraa tuuladayada wax aan u aqaannay meesha dunida ugu qurxoon ee ugu liibaan badan. Sida muuqata magaca waxaa loogu bixiyay iyada oo libaaxu joogi jiray. Dhul daaqsimeed la jecel yahay laakiin oommane ah bay ahayd intii aan la berkedayn. Imika haddii aan jiilaalku dheeraan berkadaha ayaa nagu filan oo dad iyo duunyaba laga cabbaa.

Aarjoog oo ahaan jirtay ay jiq ah oo ugaadh iyo dugaag badan markii la degmeeyay waa ay furfurantay oo imika agagaarkeedu waa banbannaan weli se dhirta iyo cawsku ku badan yihiin. Reer miyiga iyo reer tuuladu dhaqan iyo dhaqaale ma ka la soocna oo waa isku mid: ka tuulada deggani miyiga wuu degaa ka kalena la mid. Dadku wuu iswada yaqaan oo qof waliba ka uu yahay waa la garanayaa. Qofka meel kale u baxa iyo kii soo kordha waa la isla og yahay. Markii aan garaadsaday aad bay tuuladu u cammirnayd oo bulsho weyn baa degganayd, maqaaxiyaha, dukaannada, farasmagaalaha, sayladda xoolaha... iyo meel waliba ceeryoon bay ahayd. Malcaamaddana arday badan baa dhigan jirtay.

Berigii aan garaadsaday reerkayagu dukaan weyn buu tuulada ku lahaa, dukaankaas oo loo yaqaannay ”Waxwalbahaye”, waayo alaabada dadkani u baahan yihiin oo dhan bay ka heli jireen, wax uuna ahaa daarta keliya ee Aarjoog ka dhisan, inta kale wax ay ahaayeen carshaan, mutullayaal iyo aqal soomaali. Ganacsiga tuulada ka sokow miyiga wax aannu ku lahayn geel iyo adhi. Aabbahay Cilmi Diraac, oo markii uu yaraa hali ku tumatay oo lug ka dhutiya, ragga talada degmada ugu horreeya ayuu ahaa, gabaygana kolba afarrey la jeclaado ayuu tirin jiray. Adeerkay Aw Barre Diraac isaguna wadaad arrimaha diinta loo la yimaaddo ayuu ahaa. Hooyaday dumarka kale agteeda ayay ku soo xoomi jireen oo martisoor iyo bulshayn ayay ku qabeen. Daarad weyn oo ciid ah oo aannu maalin walba rushaynno oo si wacan u xaadhno oo qudhac damal ahi laamaha ku hadoodilay ayay xaawalayda shaah iyo sheeko ugu ka la rogi jirtay.

Markii aan yaraa Cumar-Dheere wax uu ka mid ahaa dadka tuulada ugu caansan. Nin laf weyn oo aad u xarrago badan buu ahaa, wax uuna xidhan jiray macawiso, surwaallo, shaadhadh, go’yaal shaalal ah iyo kabo wada bilic leh. Ladnaan iyo nuur baa ka muuqan jiray. Timaha iyo gadhka sida uu u qurxiyo wax aad moodi jirtay in aanu hawl kaleba qaban. Reer Cadmeed buu ahaa oo dadka kale wuu ka ilbaxsanaa, carabidana wuu yaqaannay oo xitaa adeerkay Aw Barre diinta wuu ka la doodi jiray. Mutulle aqalkayaga u dhow buu keligii degganaa. Mutulkaa hortiisa ayuu badanaa fadhiisan jiray, halkaas ayuuna inta uu dermo dhigto oo buste ubax ku daabacan yahay ku

goglado gelinka dambe ku qayili jiray, oo heeso ku dhegaysan jiray tuuladana ka daawan jiray oo dadka ka la sheekaysan jiray. Marmar rag kale ayaa agtiisa doonyaysan jiray ama la qayili jiray. Marka uu qayilayo iyo marka kaleba aqalka walaashii Dahabo Ismaaciil ayaa falaas shaah ah looga keeni jiray, ama maqaaxida ayuu shaah ka dalban jiray ciddii la joogtana uga dalbi jiray. Cuntada waxaa loogu karin jiray guriga walaashii. Dumarka tuulada deggan qudhooda kuwa ay isugu baxdaa halkaa waa ay ugu tegi jireen oo inta ay isdul taagaan ama ag fadhiistaan la sheekaysan jireen. Intaas oo sannadood ka dib weli wax aan la yaabaa sidii Cumar-Dheere u nuuri jiray, jidh ahaan iyo dhar ahaanba.

Ninkaasi isaga oo sidaa u xarragooda sidaana u nolol wanaagsan haddana ma uu shaqaysan jirin. Geel badan oo uu dhaxlay oo walaalladii u hayeen buu kolba tulud ka iibsana jiray. Wax uu kale oo lacag ka heli jiray daar uu Burco ku lahaa taas oo kiro looga soo diri jiray. Ciyaarta jaad walba aad buu ugu ba'naa oo aroosyada laga ma waayi jirin. Ciyaarta ka sokow gaafka ayuu ka qaadi jiray heesaha cusub ee muusigga loo tumo, wuuna cod wacnaa oo si qaayo leh buu ugu luuqayn jiray. Dumarka oo dhami aad bay uga hadli jireen Cumar-Dheere, waxaa se caan noqotay gashaanti la yidhaahdo Rooda Maxamed-Dayax in ay aad u jeclayd. Mooyi xantaasi in ay run ahayd iyo in kale iyadu se aad bay uga xanaaqi jirtay. Doob weynaaday buu ahaa Cumar-Dheere, waana la la yaabi jiray isaga oo intaa la'eg oo xoolo haysta sababta uu u guursan waayay.

Anigu markii aan yaraa Cumar-Dheere waan jeclaa oo wax aan ku jeclaa xarragada iyo heesaha. Carruurtayada oo dhan nacnac buu na siin jiray, gaar ahaan jimcayaasha iyo iidaha. Aniga oo foodley ah waxa aan ku jeclaaday ma ahayn ciyaaraha oo qudha wax aan se ku sii jeclaa heeso uu dhegaysan jiray. Wax uu lahaa rikoodh weyn oo qurux badan oo ku jira gal doogo ah. Waxaa kale oo uu haystay cajalado badan oo dhammaantood heeso ahaa. Rikoodhkiisa weyn ee biliga leh nusesaace galabtii ah iyo nusesaace fiidkii ah oo BBCda laga wada dhegaysto mooyee waqtiga kale oo dhan heeso ayaa ka bixi jiray. Dadku wax ay ku canaanan jireen lacagtiisii iyo waqtigiisiiba in uu waxaa ku lumiyay, gaar ahaan baytariyada qaaliga ah ee uu rikoodhka u iibsado. Laakiin anigu heesihiiisa waan jeclaa oo dhegta ayaan u dhigi jiray haddii aan haleelo, marka aan gurigayaga joogana kol haddii aannu deris ahayn wax aan jeclaa in uu kor u yara dallaco. Si wal oo suurtagal ah waan ugu dhowaan jiray. Carruurta oo dhami agtiisa ayay tegi jireen oo heesaha la dhegaysan jireen. Marmar wuu na eryi jiray, marmarna wuu iska kaaya dayn jiray. Wax uu noo eryi jiray si aan loo dhihin carruurta waad saaqidinaysaa.

Hooballada ayaannu magacooda wayddiin jiray isaguna wuu noo sheegi jiray. Markii dambe waannu wada barannay oo codkii soo galaba waannu garan jiray. Marmar waannu ku murmi jiray oo ku sharatami jiray, dabadeed Cumar-Dheere ayaa na ka la saari jiray. Waxaa caado u ahayd in uu kolba cajaladda cusub ee Burco looga keeno aad ugu soo celceliyo oo keligeed dhawr maalmood dhegaysto. Anigu wax aan aad u jeclaa Kinsi Xaaji Aadan mar uu Cumar-Dheere dhegaysigeeda ku waallaa. Wax aan ogaaday Kinsi in ay degmadayada u dhalatay oo carruurnimadii meelahan adhiga ku raaci jirtay. Cumar-Dheere fannaaniinta uu jecel yahay heesaha wuu la qaadi jiray, sidaa darteed Kinsi Xaaji Aadan wuu la qaadi jiray. Aniguna caadadaa malaha isaga

ayaan ka bartay oo ilaa maanta heesta aan jeclaado hoobalka waan la qaadaa. Alla Cumar-Dheere heeso jeclaayee! Maalintii iigu dambaysay wax uu dhegaysanayay:

Wajiyaal isxasuusta

Indho aan ka la waarin

Nafo aan isba waayin

Laba aan ka la weecan

Wadnayaal isjeclaada

Wadku daayo oo raaga

Aan wadeeco astaynnin

Oo wadaaga xannaano

Innagaa ku wacnayne

Maxaad iiga wareegtay

Cumar-Dheere in aan u dhowaado iyo in aan cajaladaha la dhegaysto waxaa iigu dambaysay maalintii uu heestaa oo cusbayd ku soo celceshanay markii aan arkay isaga oo laabtayda eegaya. Waa markii naasuhu ii soo baxeen. Waa gugii hooyaday bilawday in ay igu tidhaahdo: "Naa lagu sii qaadye fooddad qaado! Naa lagu dhufaye ragga ka dhuumo!" Xishoodkii badnaa ee berigaa igu bilawday mooyi in aan hadallada hooyaday ka qaaday iyo in uu si dabiici ah iigu abuurmay. Maalintaa ka dib wax aan isu arkay in aan ahay naag weyn oo xeerka adag ee dumarku qabanayo. Maalmahaa ayuu Cumar-Dheere ka guuray Aarjoog oo Burco degay, halkaas oo la sheegay in uu naag reer magaal ah ku guursaday. Aad baan tallaabadaa uga xumaaday, waayo Cumar-Dheere in uu halkan joogo ayaan jeclaan lahaa.

Markii aan yaraa wax aan ka mid ahaa afar hablood oo malcaamadda dhigan jiray, inta kale oo soddoneeyo ahina wiilal bay ahaayeen. Carruurtayada aniga ayaa ugu weynaa, aabbahayna diinta aad buu u jeclaa, sidaas ayuuna aniga oo shan jir ah malcaamadda iigu daray. Guud ahaan hablaha degmadu u ma ay badnayn dhigashada Quraanka, waayo goor walba reerahooda ayay u shaqayn jireen. Malcaamadda waan jeclaa waanan necbaa. Wax aan ku jeclaa waqtigii aan reerka u adeegi lahaa, ee dhar maydhid, guri nadiifin, cunto karin, xaabo doonid, biyo soo dhaamin iyo wax kale ku daali lahaa malcaamadda ayaa iiga xiiso badnayd. Laakiin malcaamadda wax aan ku necbaa macallinka oo ardayda ulayn jiray iyo Quraanka oo aniga igu adkaa. Heesaha Cumar-Dheere ayaan Quraanka ka jeclaa, markaas baan is odhan jiray naa malaha sheyddaamad baad tahay! In aan Quraanka jeclaado ayaan jeclaa laakiin wuu igu adkaa, heesuhuna waa ay ii fududaayeen.

Waxaa macallin noo ahaa Aw Maaddey, kaas oo lagu sheegi jiray reer koonfureed. *Reer koonfureed* wax aan moodi jiray qabiil kale oo aan qoladayada ahayn. Wadaadku wax uu ku hadli jiray af soomaali dirqi lagu fahmayo kolkolna aan waxba laga garanayn. Tusaale ahaan adhi wax uu ugu dhawaaqi jiray *ari*, riyaha wax uu u yaqaannay *ari cad*, go wax uu odhan jiray *good*, caday wax uu u yaqaannay *rumay*, oohin wax uu u yaqaannay *boohin*, rikoodhka Cumar-Dheerena wax uu ku sheegi jiray *naastaro*. Macallin Maaddey af soomaaligiisa ma aan wada fahmi jirin laakiin marka uu hadlayo waan jeclaa. Aniga oo garaad leh buu dhulka yimid, waanan xusuusan ahay markii loo dhisay Qamar oo aabbaheed hablo badan lahaa, waanan xusuusan ahay markii uu malcaamadda macallinka ka noqday.

Macallinkii kan ka horreeyay berkad buuxda ayuu ku dhacay oo ku haftay kuna dhintay. Ardayda iga waaweyni wax ay ii sheegeen in uu aad u dili jiray, qaarkoodna ulihii uu jidhkooda ku suntay bay i tuseen. Arday la yidhaahdo Jaamac-Madoobe oo laba sannadood iga weynaa haddii macallinkaa dhintay la soo qaado wax uu odhan jiray: "Ilaahay u ma naxariisto!" Kolkii aan yara weynaaday wax kale oo badan baan dhimashada wadaadka ka maqlay. Berkadda in uu ku dhacay, in lagu riday si loo dilo, iyo in uu isagu ogaan isugu riday intaba waa la sheegay. In uu ku dhacay waan garan karaa waayo reer Aarjoog badankoodu dabbaasha ma ay aqoon horena berkad lagu dhacay waa lagu dhintay. Laakiin in lagu riday ama isagu ogaan isugu riday ayaa yaab lahayd. Waxaa la sheegay macallinku maalmahaa uu dhintay in aan caafimaadkiisa nafsadeed wanaagsanayn, waayo waxaa ku socotay eed foolxun oo ahayd in dhawr jeer la arkay isaga oo gabadh yar oo agoon ah oo uu macallin u ahaa naagnimo u salsalaaxaya. Markaas baan aniguna bilaabay marka magaciisa la soo qaado in aan idhaahdo: "Ilaahay u ma naxariisto!"

Aniga oo shan jir ah baa malcaamadda la igu daray, wax aana la iga saaray aniga oo toban jir ah. Quraanku wuu igu adkaa sidaa darteed maan dhaafin Suuradda Qaaf, laakiin ardayda uu Maaddey wax u dhigaa sidoodaba Qaaf ma dhaafi jirin. Cishooyinkaa malcaamadda la iga saaray ayay qiso qosol badani dhacday. Waxaa la ogaaday Macallin Maaddey ardaydiisu marka ay Suuradda Qaaf gaadhaan in uu Camma ku soo celiyo. Iyada oo taa lagu la yaabban yahay bay rag uu adeerkay Aw Barre ka mid yahay wadaadka wayddiiyeen sababta uu carruurta Qaaf u dhaafin waayay ee dib ugu soo celinayo. Isaguna wax uu ku garnaqsaday hadal Aarjoog oo dhan caan ka noqday oo dusha laga wada qaybay. Wax uu yidhi: "Fiiri, Jabal Qaaf buur dheer waaye oo dheeldheel ma lagu fuuli karo. Ilmaha ineey gadaal gadaal u baxaan oo ayaga oo biibaaya hal mar orod ku koraan aan rabaa! Haddii kale waa ka soo taraaraxayaan!" Hadalkaa in hagaag loo fahmi waayay ka sokow aad baa loo la yaabay, markii dambena maad baa laga dhigtay. Waxaa la ogaaday run ahaanta macallin Maaddey Quraanba in uu ilaa Qaaf ka yaqaan. Dabadeed wax ay noqotay in macallin kale la doono isagana la eryo. Laakiin markaa gabadhii la siiyay durba laba ilmood ayay u lahayd, adhi door ahna wuu helay, dabadeed ninkii shalay isaga oo keligii ah Aarjoog soo galay isaga oo reer iyo xoolo dudduucaya ayuu koonfur qumman u dareeray oo dhulkiisii ku noqday. Warkiisa dib u ma aannu maqlin. Waan u hiloobay isaga iyo af soomaaligiisii jajabnaa ee aad moodaysay in uu isyeelyeelayo. Beri dambe ayaan

ogaaday *reer koonfur* in aanay qabiil ahayn ee yahay dhul weyn oo soomaali badani ku nooshahay.

Malcaamadda intii aan la iga saarin wax aan ku jeclaa carruurta kale ee aannu inta macallinku naga maqan yahay wada ciyaarro ama sheekaysanno. Haa, marka macallinku naga dhaqaaqo ayaannu looxaanta daadin jirray oo ciyaar bilaabi jirray. Markaa wax aan dunida ugu jeclaa sheekada iyo kaftanka Jaamac-Madoobe. Aad buu u madoobaa, haddana dhiig furan iyo dub nuuraya ayuu lahaa. Aad buu u ilko cadcaddaa, aad buuna u indho wacnaa. Laakiin muuqiisa wax aan ka sii jeclaa dabeecaddiisa iyo sida wanaagsan ee uu aniga ii la dhaqmo. Reerkoodu miyiga ayay yaalleen, adeerkii oo maqaaxi haysta ayaa se halkan ku hayay. Wax uu jeclaa in uu adeerkii maqaaxida ka la shaqeeyo laakiin adeerkii ayaan u oggolaan jirin wax aan ahayn barashada Quraanka. Wiil fahmo badan buu ahaa oo isaga ayaa Quraanka noogu sarreeyay kabiirna noo ahaa.

Jaamac-Madoobe wuu i jeclaa, taana wax aan ku garanayaa mar allaale marka macallinku naga dhaqaaqo ayuu halka aan fadhiyo iigu iman jiray. Saddexda hablood ee kale isku meel baannu fadhiisan jirray, laakiin keligay buu i la qosli jiray oo ii sheekayn jiray. Kurayada kale wuu iga celin jiray, Quraankana wuu iga sarreeyay oo wixii aan garan waayo wuu iigu soo celin jiray. Marka aannu wada joogno wuu faraxsanaan jiray oo wejigiisu wuu iftiimi jiray, wax wal oo wanaag ah ayuuna isku dayi jiray in uu sameeyo. Beri dambe ayaan bartay waxaa in jacayl la yidhaahdo, laakiin berigaa inan wanaagsan uun baan u arkayay. Wax aan baraarugay markii aan lix iyo toban jirsaday isaguna siddeed iyo toban jirsaday, ee uu aniga oo galab ayda xaabo ka doonay inta uu i raacay oo xaabadii i la soo guray kolkii aannu soo soconnay i joojiyay, ee inta uu iskay hortaagay igu yidhi: "Safiyaay, haddaba maxaad ka qabtaa in aynnu isguursanno?"

Markii Jaamac-Madoobe hadalkaa i yidhi dhulkaa i la wareegay. Xaabadii aan xambaarsanaa aniga oo aan ogayn inta aan xanjeerka u furay oo dhulka ku tuuray ayaan ku dul fadhiistay. Aad baan u gariiray run ahaantii. Waxaa i gilgilay oo dhulka i dhigay dareen laxaad leh oo aanan macnayn karin. Jaamac-Madoobe wax uu ahaa inan wanaagsan oo aan la joogistiisa jeclaa, dabcigiisana aad uga heli jiray, laakiin guurku wax iga weyn oo aanan u bislayn buu ahaa. Cilcillawgaa aanan jaahiisa si wanaagsan u arkayn wax aan u awooday oo qudha: "Walaal gacaliye, maya ku dhihi maayo ee reerka i wayddiiso." Intii aan wareersanaa hadal badan buu sii shubayay, anigu se wax aan intaa ahayn waan hidin waayay. Beri dambe ayaan naftayda u qirtay in ay habboonayd in aan Jaamac-Madoobe fikraddaa ka yeelo, laakiin jacayl ma aan garanayn, go'aan ma aan qaadan karayn, calafkuna waa wax qoran.

Jaamac-Madoobe intii aanu reerkayaga i wayddiisan ayay reerkooda qudhoodii talada ku diideen oo ku yidhaahdeen "weli nin yar baad tahay". Dabadeed wuu iga hadhay, isaga iyo ciddoodiina waa ay ismaandhaafeen oo murankoodu degmada oo dhan buu gaadhay. Maalintii dambe iyada oo aan la ogayn buu geelooda laba gool ka kaxaystay, oo inta uu Burco ka iibsaday lacagtii Hargeysa la qabtay. Beri dambena waxaa lagaga soo warramay in uu dhulka carabta u dhoofay. Markaa waan qirsanaa Jaamac-

Madoobe in aan jeclaa. Goor walba wax aan Ilaahay ka baryi jiray marka uu soo shaqaysto in uu soo noqdo oo annu reer wada yeelanno, waayo sidaas ayay badanaa ragga carabta u dhoofaa samayn jireen. Lacagta ay soo xoogsadaan halkan ayay la iman jireen oo xoolo ku iibsan jireen, baraago ku qodan jireen, ganacsi ku dhisan jireen, oo ku guursan jireen. Laakiin Jaamac-Madoobe dib u ma soo moqon.

Markii aan garaadsaday Aamina-Dhudi wax ay ahayd inanta loogu jeclaa hablaha Aarjoog. Waxaa adeer u ahaa Cumar-Dheere, kii xarragada badnaa ee ciyaarta wacnaa ee heesaha jeclaa ee Burco u guuray, waxaana eeddo u ahayd Dahabo Ismaaciil oo tuulada macaash ku haysatay. Islaantaas oo odaygii beri hore ka dhintay labadii ilmood ee qudha ee ay dhashayna ka saqiireen ayay Aamina-Dhudi la joogtay oo ubad iyo wehel u ahayd. Reer aabbaheed miyiga ayay degganaayeen laakiin lagu ma tirin jirin ee taladeeda islaanta ayaa lahayd. Ilaahay qof uu abuuray oo Aamina-Dhudi ka dadnimo wacan la i ma tusin. Dabeecadda lagu wada yaqaannay ee lagu wada jeclaa wax ay ahayd bulshaynnimada iyo furfurnaanta. Alla maxaa inantaa la jeclaa!

Habluhu masar ayay timaha ku xidhan jireen marwooyinkuna gambo, laakiin iyadu timaheeda weligeed masar ma ay saarin. Waxaa ka daran sida ay timaheeda u jeclayd ee uga shaqayn jirtay. Iyaga oo ay maydhay oo saliideysay oo saaftay oo aad mooddo baal haldhaa ayay laydha ku ciyaarsiin jirtay. Timaheedu wax ay ahaayeen kaftanka iyo sheekada iyada iyo dumarka kale ka dhexeeya. Anigu markii aan yaraa Aamina-Dhudi aad baan u jeclaa oo waan ku dayan jiray. Marka aan waynaado in aan sideeda yeelo oo timaha inta aan maydho oo saliideeyo oo si wacan saqaf u mariyo aan ciyaarsiyo ayaan u hilowsanaa. Sababtu wax ay ahayd ma garanayo laakiin Aamina-Dhudi wax ay ii ahayd Kinsi Xaaji Aadan tii aanan weligay arag laakiin heesaheeda Cumar-Dheere ka bartay.

Timaha uun ma aha ee Aamina-Dhudi sida ay dharka u xidhato, sida ay u tallaabsato, sida ay ragga u la hadasho, iyo sida ay u kaftantaa wax ay iiga dhigeen tusaale aan ku daydo. Sidaas ayaan u jeclaa xitaa iyada oo dumarka qaar ku xantaan in uu jiro nin ay u jajaban tahay. 'Jajabnaan' waxa laga wado waan garanayay. Rag badan baa caashaqsanaa oo doonayay in ay guursadaan, laakiin midna calaf isu ma gelin. Beri dambe nin Sacuudiga ka soo degay baa guursaday oo la dhoofay. Aad baan dhacdadaa uga xanuunsaday, waayo Aamina-Dhudi wax ay ahayd xiddigta degmada iyo tusaalahayga. Wax aan maqli jiray dumarka Sacuudigu in aanay guryaha ka soo bixin iyo in ay dhar waaweyn oo madow isku dedaan, markaa wax aan iswayddiiyay sida ay dadkaa iyo Aamina-Dhudi u heshiin doonaan. Tolow ma guriga dhexdiisa uun bay timihii yaabka badnaa ku ciyaarsiin doontaa? Inantaa wax aan ugu hiloobay isla sidii aan ugu hiloobay Jaamac-Madoobe, Cumar-Dheere, Macallin Maaddey iyo dadkii kale ee degmada ka tegay ee ku soo noqon waayay.

Aarjoog iyo dadkeeda aad baan u jeclaa. Markii aan garaadsaday ilaa aan dhawr iyo labaatan jirsaday wax aan moodayay in aan janno ku jiro, dabadeed qunyar qunyar bay jannadii u ka la daadatay. Horta dad badan baa sababo ka la duwan dhulka uga tegay. Mar kale bandoo baa na la saaray oo askar hubaysan baa gaadiidkii noo iman jaray iyo dhaqdhaqaaqii oo dhan xayirtay, taas oo ganacsigii curyaamisay dhaqaalihiina

dumisay. Markii ay noloshii adkaatayna dad kale oo badan baa magaalooyinka iyo qurbaha u yaacay. Haddana askartii baa maalin na gabagabaysay oo raggii haldoorka ahaa oo dhan xabsi u qaadday. Dabadeed kol haddii aan ganacsi jirin nabaddiina xumaatay dadkii oo dhami miyiga ayay u guureen, tuuladiina wax ay noqotay cidla waaqla. Maanta waxaa jooga keligay oo halkan ku haya ayayday oo itaal daran oo reer guuraaga raaci kari wayday.

Anigu mar haddii aannu Jaamac-Madoobe iswaynay ragga kale ma aan ka la jeclayn, gayaankuna wuu ii sinnaa, sidaas baan ku guursaday Cali-Afweyne oo aannu qudhiisa isku kacaan ahayn. Dukaanka reerkooda ayuu hayn jiray berigii aannu isguursannay, miyiga ayuu se reer kale ku yeeshay. Afar carruur ah baannu isu dhallay uu kii ugu yaraa naga saqiiray. Labada inan ee waaweyn adeerkood baa Burco ku haya oo waxbara, fasaxyadana badanaa aabbahood ayay geela la hayaan. Inantiina dhowaan baa aabbaheed nin reer guuraa ah u dhisay. Sidaas ayaan isugu xilqaamay in aan ayayday halkan ku hayo. Marka aannu kelida nahay habeenkii waan baqaa maalintiina waan cidlodaa, islaantuna wehel ii ma noqoto waayo maskaxdeedu ma hagaagsana oo keligeed baa isla dhuranta. Carruurta marmar ayay ii yimaaddaan oo aan jeclaystaa in ay i la joogaan. Marmar kale dad socoto ah ama dad berkadaha u soo biyo doonta ayaan la kulmaa oo la sheekaystaa.

Maalmahan waxaa xanuun igu noqday isbeddelka intaa la'eg ee Aarjoog ku dhacay. Maskaxdayda waxaa waalli ku riday xusuusta ku saabsan quruxdii, farxaddii iyo cammirnaantii Aarjoog ka jiri jirtay iyo sida ay maanta tahay. Wax aanba ka baqayaa in aan sida ayayday isla hadlo. Galab baan markii qorraxdu qabowday aniga oo keli ah dhex tamashleeyay dhismayaashii wada cidlada ahaa ee carshaanta iyo cooshadaha u badnaa. Naf dhaqaaqda oo aan aniga ahayni ma joogto, iyo ayeeyo oo sidii caadiga ahayd aqalka hortiisa hawaarta oo isla hadlaysa. Marba surin ay dadku qulquli jireen imika se doog qariyay baan maraa. Aqal nololi ka buuxi jirtay imikana abaaday baan eegmada ku hakiyaa. Dukaannadii cammirnaan jiray oo mid walba daaqadda iyo albaabku isu foodhyayaan baan dhaayaha u yara daayaa. Waa kaa mutulkii Cumar-Dheere oo aad xabaal mooddaa. Waa kaa aqalkii Aamina-Dhudi degganaan jirtay isaga oo dumay masacagalay dhex jifto. Waa kaa dukaankayagii Waxwalabahaye oo u ekaaday damal qallalay. Wax aan ka murugooday foolxumada malcaamaddii oo tiirarkii oo mudhuxsan qaar sii qotomaan. Aarjoog dabaysha dhankaa kaga soo dhacdaa iyada oo qatan bay dhanka kale uga baxaysaa. Aamuska ayaa ka daran iyo baqdinta nafta gelaysa. Codka qudha ee dhegtu maqli kartaa waa sharqanta mas ama mulac mus jibaaxay. Dabadeed waan iskaga baxay oo ayda ayaan u xaabo doontay.

Fiid cilcillawgii baan aniga oo xaabadii xambaarsan soo noqday. Weli dunidu aad bay u aamusnayd, duryankii islaantuna weli maqalkayga ma soo gaadhin. Jawigu weli baqdin iyo beerqaad buu lahaa. Wax aan la yaabay shimbirihii xitaa waxa aamusiiyay. Intii aanan tuulada gudaha u gelin ayuu dhawaaq si kale ahi dhegahayga ku soo dhacay, markii aan isyara taagay ee sii dhegaystayna wax aan gartay codku in uu ka imanayo dhanka aan u socdo. Waan sii tallaabaday aniga oo wajiga dadbaya si aan dhawaaqa ii baxay dhegta ugu rito. Tallaabada aan qaadaba dhawaaqu wuu soo xoogaysanayaa,

kolonii aan si wacan u maqlayna in aan rumaysto iska daaye waalli baan ka qaadi gaadhay. Waxaa baxaysa hees ay dhawr iyo soddon sannadood igu dambaysay:

Wajiyaal isxasuusta

Indho aan ka la waarin

Nafo aan isba waayin

Laba aan ka la weecan

Wadnayaal isjeclaada

Wadku daayo oo raaga

Aan wadeeco astaynnin

Oo wadaago xannaano

Innagaa ku wacnayne

Maxaad iiga wareegtay

Ma run baa mise waan riyoonayaa? Ma ismoodsiis hilawgu igu hodayaa? Waan sii socday ilaa aan daaradda aqalkayga kadinkeeda gaadhay. Mutulkii aannu deriska ahayn ee kharaabadda noqday iftiin weyn baa ka baxaya; iftiin aad mooddo in foolxumada habeenka soo socda lagaga hor tegayo. Isla halkaa ayay heestu ka soo baxaysaa. Imika ayaan yaqiinsaday in aanan dhalanteed ku jirin. Xaabadii inta aan daaradda ku qubay baan u dhaqaaqay dayrka oodda ah ee ilayska iyo codka noo dhexeeya; halkii aan istaagi jiray berigii aan yaraa marka aan doonayo in aan dhegaysto heesaha Cumar-Dheere. Haa, waa mutulka qudhiisii meesha lagu soo kordhay. Heestu wax ay ka baxaysaa rikoodh weyn oo siraadanaya oo mutulka hortiisa yaalla, gudahana ilays iyo dhaqdhaqaaq baa ka socda. Aniga oo weli u qaadanla ayuu oday aan madaxiisa timo lagu ogayn oo aad u shilis oo calool weyni mutulkii ka soo baxay. Ilbidhiqsi gudihii ayay maskaxdaydu afartan sannadood in ka badan dib ugu carartay. Dabadeed odaygii oo aad mooddo noole duni kale ka yimid baa cod weyn igu yidhi:

"Waa Tuma! Nabad ma la sheegay?"

"Waa nabade, idinkuna nabad ma sheegteen?"

"Waa mahad Allee, gurigaa reer baan ku ogaaye waa tuma?"

"Ee ma Cumar-Dheeraa?"

Qosol aan macno lahayn oo hadalka lagu hagaajiyo inta uu soo horraysiiyay ayuu raaciyay:

"Hadda malaha waa inantii yarayd ee Safiya Cilmi Diraac!"

"Horta wajigaaga si wacan u ma arko ee Cumar-Dheere ma tahay?"

Haa, waa Cumar-Dheere oo hordhac u ah fufka noloshee Aarjoog ee xaaluftay. Waa duco Ilaahay iga ajiibay inta aan nool ahay in aan arko Aarjoog oo mar kale lagu nool yahay oo lagu faraxsan yahay oo cammيران oo dadkeedii iyo dadkii ay dhaleen ka buuxaan. Duco la iga aqbalay bay ahayd oo sannad gudihi ayay wax weyni isbeddeleen oo dad badani soo degeen oo ganacsi firfircooni dib u bilawday.

Cisho dambe baabuur Siisow ah oo Burco ka yimid baa goor galab ah Aarjoog isa soo dhex taagay. Sidii caadiga ahayd waa lagu ururay si dadka la socda iyo alaabta saaran loo arko. Dadkii ka soo degay waxaa ka mid ahayd islaan xijaab madow ku daboolan. Anigu waan ka durugsanaa wax aan se maqlay dadkii ku xoomay oo leh "alla waa Aamina-Dhudi! Alla waa Aamina-Dhudi!". Dabadeed sidii ilmo yar baan ku cararay oo ku dhegdhegay. Laakiin Aamina-Dhudi ma ahayn tii beri fog naga dhooftay. Timihii dheeraa ee quruxda badnaa, tallaabadii geesinnimada lahayd iyo kaftankii macaanaa ma laha. Waa islaan maryo waaweyn ku duuduuban oo hadal yar oo aan faraxsanayn.

Isla maalmahaa ay noloshee tuuladu fuftay ayaan garwaaqsaday wax waliba in ay beddelmeen oo aan wax sidii hore u soo noqonayaa jirin. Dadkii qof waliba waa qof kale muuq, maan iyo macaammilba. Geedihii caanka ahaa ee tuulada ku yaallay ama u dhowaa waa ay wada dhaceen oo dhir cusub baa maanta caan ah. Balliyadii aan ku garaadsaday waa ay aasmeen oo kuwo kale ayaa samaysmay. Heesaha la dhegaysanayaa kuwii aan aqaannay aad bay uga duwan yihiin. Wax waliba waa wax kale. Arrin qudha ayaan se dunidii hore ka hayaa, taas oo ah heesaha oday Cumar-Dheere. Anigu imika rikoodh baan haystaa oo cajaladaha waan ka soo qaataa, isagana waxaa lagu salliday wadaaddo yaryar oo surwaallo gaagaaban oo gadh dhuudhuuban oo maalin walba muran u la taagan iyaga oo heesaha u diiddan. Wuu iska celiyaa oo marka ay daaliyaan inta uu bakoorradda xoog dhulka ugu dhufto ayuu ku qayliyaa markaas ayay ka yaacaan. Ilaahay Cumar-Dheere cimrigiisa ha raajiyo, waayo waa geesi duni wacan oo dhimatay ka soo hadhay.

Aniga oo xaalad nafsadeed oo sidaa u calawsan ku jira ayay dhacdo weyni soo korodhay. Aroor baan ku soo toosay Jaamac-Madoobe oo farasmagaalaha taagan oo rag u warramaya. Ilbidhiqsigii aan indhaha saaray ee gartay ayay maskaxdayda ku soo dhacday in aan carmal ahay oo aannu ninkaygii ka la tagnay. Aniga iyo Jamac-Madoobe oo nolol wadaagnaa ma ka mid noqon doontaa ducooyinka la iga ajiibay? Haddii ay taasi dhacdo waan ka samri lahaa hilowgii i dilooday. Aqalka ayaan dib ugu noqday oo inta aan si wacan u dhaashtay oo indhakuushay dharkayga intii igu wacnayd gashaday. Wax aad i moodaysay in aan iidayo. Markii labaad ee aan aqalka ka soo baxay eegmada aannu aniga iyo Jaamac-Madoobe isku raajinnay waxaa ku dhex jirtay luuqda hees uu isla markaa odaygii Cumar-Dheere shiday:

Wajiyaal isxasuusta

Indho aan ka la waarin

Nafo aan isba waayin

Laba aan ka la weecan

Wadnayaal isjeclaada

Wadku daayo oo raaga

Aan wadeeco astaynnin

Oo wadaago xannaano

Innagaa ku wacnayne

Maxaad iiga wareegtay

Email: ibraahinhawd@hotmail.com

Web: <http://www.ibraahinhawd.com/>